

WIXII AAN KALA KULMAY SAFAARADDA SOOMAALIDA EE TURKIGA LABA GOOR OO AY DAN IIGA XIRANTAY

Waxaan dalka Turkiga markii u horreysey imid bartamihii sanadkii 2017. Rubacii ama waaxdii hore ee sanadkii 2018 ayaa markii u horreysey ay Safaaradda Soomaalida ee Ankara dan iiga xirantay, taas oo ahayd caddaymo ay iiga baahdeen Hay-adda Socdaalka Turkiga xafiiskeeda Ankara. Dabadeed haddii aan dadka ka warsaday sidii aan hawshaas ugu hawl geli lahaa, waxaa la ii sheegay in safaaradda la tago kadibna ay hawshu halkaas ka bilaabmayso. Markii aan safaaradda gaarey, waxaa iridda hore ee laga galo qol yar fadhiyey nin waardiye ah oo Turkey ah. Luqadda Turkiga ma aan garaneyn marka waan salaamay waxaana u ishaaray in aan safaaradda dan ka leeyahay oo gudaha u socdo, isaguna wuxuu ii ishaaray in aan gudbo. Dabadeed safaaraddii ayaan gudaha usii galay oo qolka sugitaanka fariistay halkaas oo dad kalena ay fadhiyeen.

Markii aan in door ah halkaas fadhiyey cid aan dantayda kala hadlana aanan wali garaneyn, ayaan kacay oo dhowr albaab oo furnaa hanqolooocsaday. Dabadeed waxaa la ii tilmaamay xafiis si aan uga eego ciddii qaabilsanayd hawsha aan u socdey. Dabadeed waxaan u dhaqaaqay xaggii xafiiskii la ii tilmaamay oo qooraansaday albaabkiisa uu qayb furnaa waxaana ninkii xafiiska fadhiyey uu ii idmay inaan soo galo. Kadib waxaan u sheegay dantii aan u socdey, dabadeedna hawshii aan u socdey ayaa la ii bilaabay waqti kale in aan usoo noqdana waa la igu war geliyey. Intii aan safaaradda dhex joogey waxaan arkayey dad kala duwan (Soomaali iyo Turki) safaaradda soo galaya oo fiisooyin iyo dano kale u imaanayey oo iyaguna aan sidayda oo kale ballan ku imaan.

Dabadeed maalin kale ayaan usoo noqday oo ka qaatay warqadihii la ii sameeyey. Waxaan dabadeed warqadihii la aadey Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Turkiga si ay u tasdiiqiso ama u xaqiijiso. Waxaan galay saf dheer iyo security check kadibna warqadihii la iga qabtay oo sugay in door ah. Kadib waxaa la ii sheegay inaan lacag ka soo bixiyo xafiis meesha ku yaalley oo aan isagna saf u galay kadibna waxaan warqaddii lacag-bixinta ku celiyey xafiiskii isoo diray kadibna sugaataan xoogaa ah kadib waradihii la ii dhammeeyey.

FIIRO GAAR AH:

Noq-noqodkaas badan iyo xafiisyadaas kala duwan ee aan hawshaas u marayey waxaa iiga baxayey waqti badan iyo kharash badan oo isugu jira kirooyin gaadiid (tareen, bas iyo taksi).

Saddex sano kadib ayaa mar kale ay dan iga gashay safaaradda Soomaalida ee Ankara (Qunsuliyadda) oo ay iiga xirmeen warqado qoys oo uu iiga baahday xafiiska Hay-adda Socdaalka Turkiga ee Ankara. Dabadeed waxaan gudo-galay in aan waddadii xeer Soomaaliga ee hadda ka hor ay wax iigu hagaageen qaado. Haddii aan safaaraddii imid waxaa albaabka hore joogey waardiyihii aan saddex sano ka hor halkaas ugu tagey. Waxaan waardiyihii u sheegay inaan gudaha doonayo oo safaaradda ay dani iiga xiran tahay. Wuxuu na waydiiyey in aan ballan leenahay dabadeedna markii aan ku niri maya, wuxuu noogu jawaabey “YOK”. Waxaan filayaa qofkii maqli jirey IIMAAN-YOOK, inuu YOK garan karo. Dabadeed markii aan halkaas hungo kala soo noqday ayaa waxaan raadiyey qaabka aan ballan ku samaysan karo waxaana la iisoo diray website-kii safaaradda:

<https://ankaraemb.mfa.gov.so/Negeeye.aspx>

Wixii aan website-kaas kala kulmay waxaad ka akhrisan kartaan qoraalladan hoose ee na dhex maray aniga iyo safaaradda Soomaalida ee Turkiga!

Somali Embassy Ankara

Negeeye
Adeegga Negeeye

SIGN IN

Email

Password [Forgot Password?](#)

Remember Me

Sign In

< Somembassy



Abdulkadir Khalif
Hashi
Ku soo dhowow
Adeegga Negeeye.
Dalabkaagii wuu na
soo gaadhay.
Somali Embassy
Ankara
B186

15:43

< Somembassy



15:43



Abdulkadir Khalif
Hashi ,dalabkaagii waa
la aqbalay,
waxaa kula soo
xidhiidhaya qaybta
maaliyadda .
Mahadsanid
Safaaradda
Soomaaliya ee Ankara
B186

16:12

< Somembassy



16:12



Abdulkadir Khalif Hashi ,Fadlan lacagta ku soo bixi Account-bangiyada hoose.

Total: 313 TL

Bank Details:

Kuveyt Turk

Bankasi(TL)

Name: SOMALI

CUMHURIYETI

BUYUKELCILIGI

Account No:

94815436

IBAN: TR94 0020 5000

0948 1543 6000 02

Ama

VakifBank (TL)

< Somembassy



Ama
VakifBank (TL)
Name: SOMALI
CUMHURIYETI
BUYUKELCILIGI
Account No:
[445001297649](#)
IBAN:
TR4000015001580073
01686929
Rasiidhka aad lacagta
ku soo bixisay ku soo
dir bogga aad ku
leedahay Adeegga
Negeeye
Safaaradda
Soomaaliya ee Ankara
B186

< Somembassy



15/10/2021 Fri



Abdulkadir Khalif
Hashi ,mahadsanid
Lacagtii waad bixisay,
dalabkaagii waa laga
shaqaynayaa.
Mahadsanid
Safaaradda
Soomaaliya ee Ankara
B186

15:14

< Somembassy




18/10/2021 Mon




Abdulkadir Khalif
Hashi , dalabkaagii
waa la dhammeeyey,
waxaa loo diray
tasdiiga Wasaaradda
Arimaha Dibadda ee
Turkey.
Safaaradda
Soomaaliya ee Ankara
B186

12:44



Saddex beri gudahood ayaa hawshaas ii dhammaatay oo gurigayga la iigu keenay aniga oo aan u dhaqaaqin oo safaarad aan tagin oo safar kale u gelin oo aan taksi iyo gaadiid kale midna lacag iga qaadan. [What a change!](#)



Idinku waad dadaasheen waadna noo hawl fududayseen, maxayse kuugu taal Soomaali in badan baa arrimaha inay daaqadaha ka galaan ka jecel inay albaabada ka galaan!

Waa **testimonial**. Aad ayaan ugu mahad celinayaa Safiirka Soomaalida ee Turkiga **His Excellency, Ambassador Jaamac C/laahi**, qunsullada iyo shaqaalaha safaaradda iyo qunsuliyadaheeda horumarka iyo isbeddelka weyn ee ay ku sameeyeen safaaradda taas oo sumcadda safaaradda inay kor u qaadday ka sokow, waqti iyo dhaqaale badan u baajisay una baajin doonta mustaqbalka bulshada ay u adeegayaan. Allaah ha idin garab galo.

Cabbdulqaadir Khaliif